


# CODSIGA CAWIMAADDA LACAGTA, RAASHINKA, IYO CAAFIMAADKA

**Ukhaas Ah Xafiiska** – Balan wakhti iyo taariikh leh ayaa lagu siin doona kadib markaad buuxiso foomkan soosocda .

**Taariikhda Balanta:** \_\_\_\_\_

**Wakhtiga Balanta:** \_\_\_\_\_

## Sideen u codsan karaa caawin?



### Waxaad ubaahan tahay inaad:

1. Dhamaystirto arjigan.
2. Ku xaree arjigan Qaybta Degmada ee Shaqada iyo Adeega Qoyska (CDJFS).
3. Dhamaystir waraysiga.
4. Keen caddeyn ku saabsan barnaamijyada arjigaagu kusaabsanyahay, cadaynta waxaa lagu sharaxay bogga ku xiga.

## Ma u baahan tahay in lagaa caawiyo dhamaystirka arjigaan?



1. **Haddii aysan luuqadda Ingiriisku ahayn luqadaada koobaad:** CDJFS ayaa keenaysa qof kaa caawiya si aad u fahamto su'aalaha arjiga ku qoran ee waraysiga.
2. **Haddii aad meel naafo ka tahay, sida maqalka ama aragga:** Waanu kaa caawinaynaa buuxinta foomkan iyo waliba waraysiga.
3. **Waxaan kaloo ku caawin doonaa wakhtiyada kale, sida:** Markaad soo sheegaysid isbadalka, ama markaad su,aalo ka qabtid kiiskaaga..

## Sideen u dhamaystiri karaa arjigaan?



1. **U buuxi arjigan si dhamaystran:** Kajawaab su'aalo badan intii aad awoodid. Xaq waxaad u leedahay in aad codsato caawin maalinta aad la xiriirto CDJFS.
2. **Haddii aadan buuxin Karin arjigan:** Buuxi bogga koobaad ee arjiga ku qor magacaga, ciwaankaaga, iyo saxiixaga kadibna u celi xafiiska CDJFS si aan kuu siino caawimaad laga bilaabo maanta haddii aad u qalanto. Waxaad buuxin karta inta kalee hartay arjiga adoo gurigaga jooga kadibna kusoo celi xafiiska CDJFS.
3. **U xaraynta qof kale:** Waad dooran kartaa inuu qof kuu xareeyo asagoo ku caawinaya adiga, Qofkaas waxa loo yaqaan wakiil la aqoonsanyahay. Haddii aad u xaraynayso qofkale, kaga jawaab su,aalaha siday ula xiriiiraan shaqsigaas.

## Xageen u celinayaa arjigaan?

1. **U celi arjigaan xafiiskaaga deegaankaaga ee CDJFS:** Tani waxay bilaabaysaa habka arjiga ee dhamaan barnaamijyaa caawinta. Saacadaha Xafiiska Shaqadu degmo kasta way kala duwanyihiin. Si aad u raadiso xafiiska degmadaada ku dhufo halkan [http://jfs.ohio.gov/County/County\\_Directory.pdf](http://jfs.ohio.gov/County/County_Directory.pdf)

## Sidee u dhameys tiri karaa waraysiga fool kafoolka ah?

1. **U imaw waraysigaaga:** Inta lagu gudo jiro waraysiga, waanu dhamaystiri doona inta hartay habka arjigaan. Waxaan kaloo ku sheegi doona wixii caawin ah eed heli kartid.
2. **Hadii aadan u imaan Karin waraysiga:** Waa inaad la xiriirta xafiiskaaga CDJFS si jadwalkaaga waraysiga loo badalo. Haddii aadan nala soo xiriirin 30 maalmood gudahood laga soo bilaabo taariikhda faylka arjigaaga, ma heli doontid caawimaad waana inaad dib usoo xaraysaa arjiga. Waa macquul inaad imaan karin waraysiga hadii aanu aragno in xaalad adag kugu timid sida xanuun isgaarsiin la,aan

## Xaqiijin nooc ee ah ayaan u baahnahay?

Shaxda hoose waxay taxaysaa waxyaalaha lagaaga baahan yahay barnaamijka ood codsanaysid. Kala xiriir xafiiskaaga CDJFS tusaale ahaan waraaqaha aad cadaynta u isticmaalaysid. Haddii aadan keenin waxoo dhan, u imaw waraysiga waanu ku caawin doonaaye.

- Haddii aadan ahayn muwaadin Maraykan ah ee aad u codsanayso kaliya caawin caafimad oo degdega, lagaagama baahna inaad keento cadayn muwadinimadaada ah, ama laanta socdaalka, ama inaad keento Sooshaal Lambarka.
- Cuntada lagugu caawiyo waa la kordhin haddii aad keento caddayn kharashaadka kuwaan soo socda: cunuga/kutiirsan daryeelka, kaalmada caruurta lagu baxsho caruurta aan kula noolayn, guriyeeynta, dheefaha, lacagta caafimaad ee dadka naafada ah ama dadka ka wayn 60 ka sano (ay kamid tahay warqada daawada).

	Caawin Lacageed	Caawin Raashin	Caawin Daawo Qoysaska iyo caruurta	Caawin Daawo Waayeelka, indhoolaha ama naafada
Cadee inaad dalbatay Sooshaal Lambarka (haddii aadan horey u haysan mid)	✓	✓	✓	✓
Kaarka degaanshaha rasmigaa (Green Card) ama dukumenti kaloo INS haddii aadan ahayn muwadin maraykan ah	✓	✓	✓	✓
Cadee Mmaraykan nimadaada haddii aad muwaadin Maraykan ah tahay	✓		✓	✓
Cadee dakhligaaga lacageed ama lacag kaloo soo gasha qoyskaaga (sida xogta shaqada, canshuur celinta, abaalmarin, kaalmada caruurta)	✓	✓	✓	✓
Cadaymihi ugu dambeeyey bangiga (sida hubinta, credit union, savings)	✓			✓
Cadee lahaanshaha gaadiid (sida gaari yar, gaari xamuul, mooto, doonyo, buses)				✓
Cadee qiimaha alaabta hada kuu taal, shahaadooyinka dibaaajiga, caymiska nafta, aaminaadada, dakhliga sanadka, Cadeh aqoonsigaaga	✓	✓	✓	✓
Cadee wax lacaga oo caruurta/lagu tageero caruurta	✓	✓	✓	
Cadee wax lacag ah oo lagugu siiyay caruurtaada kuwa aan kula noolayn	✓	✓	✓	
Cadee wax dheef ah oo kaasoo gashay guriyeeyn ta		✓		
Cadee wax lacag ah oo caafimaad ee dadka naafada ah, dadka kor uga weyn 60 sano (ay ka mid tahay warqada dawada)		✓		✓
Cadee wax caymiskaaga caafimaad ah			✓	✓

## Goorma ayaan helayaa caawimaad?



**Caawimaad lacag iyo raashin:** Waxaan ku salaynaa u qalmitaanka barnaamijka cawimaadada ee lacagta iyo/ama raashinka taariikhda aad noo soo gudbisid arjigaaga oo saxiixan. U qalmitaanka barnaamijyadan waxaan go,aan uga gaaraynaa mudo 30 maalmood ah oo laga bilaabay taariikhda aan helnay arjigaaga oo saxiixan.

**Cawimaada Caafimaad:** Waxaa aasaas noo ah xaq u helidaada cawimaada caafimaad laga so bilaabo taariikhda aanu helno arjigaaga oo saxiixan, xaq u lahaan shahaaga waxaan go,aan uga gaaraynaa mudo 30 maalmood gudahood ilaa aad ama tahay qof naafo ah. Hadi aad sheeganayso inaad naafo tahay, arintaada waxaa go,aan looga gaaraya mudo 90 maalmood ah. Waxaanu raadin doonaa caawimaadada caafimaad mudo sadex bilood ah kahor bisha aanu helno arjigaaga.

## Kawaran hadaan raashin hada u baahnahay?



**Haddii aad raashin hadda u baahantahay, oo aadan helin wax raashina oodan hadda helin:** Kajawaab su'aalaha bogga kobaad iyo labaad ee foomka. Waad heli kartaa cawimaada raashin si dhaqso ah.

## Ma inaan muwaadin noqdaa?



**Maya.** Fadlan haka cabsan in haayadda muwadinimada Maraykanka iyo Adeegga Laanta Socdaalka (USCIS) ay kaa hor istaagi karaan cawimaadada aad u baahan tahay adiga iyo qoyskaaga. Muhaajiriin badan ayaa hela cawimaada lacageed, raashinka, iyo caafimaad. Xataa waxaa la heli karaa cawimaada caafimadka degdega ah ee ajaaniibta ayadoon ku xirnayn heerkaaga laanta socdaalka.

## Adeegyo kale maxaa la heli karaa?



**Waxaa laga yaabaa inaad hesho adeegyada kale sida:** Daryeelka caruurta, Daryeelka waalidka, kharashka guryaha, xirfadaha shaqo, iyo inaad shaqo hesho, adeegyadan waxay u baahan yihiin arji ka gaar ah, waydii qofka kiiskaaga haya adeegyadan. Haddii aad u baahato caawimaad ku saabsan kharashka daryeelka caruurta, kala xiriir xafiiska gudaha ee degmadada CDJFS foomka daryeelka caruurta.

-- Fadlan boggan u hayso kayd ahaan. --

# CODSIGA CAWIMAADDA LACAGTA, RAASHINKA, IYO CAAFIMAADKA

## 1. FOOMKA DIWAANGALINTA CODEEYAHA -CAWIMAADIISA LAHELI KARO

Haddii aad iska diwaan galisay in aad ka codayso meeshaad ku nooshahay, ma jeclaan lahayd inaad halkaan maanta iska diwaan galiso si aad uga codayso?

Haa, waxaan doonaya inaan isdiiwangaliyo si aan u codeeyo.  Maya, ma doonayo inaan isdiiwaan galiyo si an ucodeeyo.

**Haddii aadan midoodna calaamadin, waxaa lagu tixgalinayaa inaad go'aansatay in aadan isdiwaangalin si aad u codeyso wakhtigaan**

## 2. Noosheeg wax adiga kugu saabsau (codsade)

Dhamaystir qaybtaan adiga ama qofka aad u buuxbuuinaysaba.

Magaca Koobaad

Magaca Aabaha

Magaca Awoowaha

**Miyaad:**

**Ma u baahan tahay midkamida kuwaan?**

Indho la dahay

Turjumaan

Midkale:

Dhago la dahay

Faro ka hadal

**Xafiiska Kaliyaa Isticmaalaya**

Tarikhada La qabtay: \_\_\_\_\_

Nambarka Arjiga: \_\_\_\_\_

Kiis Nambarka: \_\_\_\_\_

Dedajin Cawimaad Raashin:  Haa  Maya

Codsasho PRC :  Haa  Maya

Codsi Daryeelka carurta  Haa  Maya

**Waliga adiga ama qof kula nooli, ma helay cawimaad lacag, raashin ama caafimaad?**  Haa  Maya

Haday Haa tahay, kuma: \_\_\_\_\_ Xagee (Magalo/Wadan/Gobol): \_\_\_\_\_

## 3. Noosheeg sida lagugu heli karo

Dhamaystir qaybtaan adiga ama qofka aad u buuxbuuinaysaba.

Ciwanka wadada  tik sii halkaan hadaad guri la,aan tahay

Magaalada

Wadanka

Gobolka

Zip Code

Taleefoon nambarka

Wakhtga wicida

Taleefan kale

Ciwaanka E-mailka

( )

( )

**Ciwanka boostada (haduu kala duwanyahay):**

Ciwanka Xaafada

Magaalada

Wadanka

Gobolka

Zip Code

## 4. No sheeg hadii aad tahay wakiil la aqoonsan yahay

Wakiilka la aqoonsan yahay waa qof caawiya arji qortaha asagoo la dhamaystiraya habka arjiga. Haddii aad u buuxinayso foomkan wakiil ahaan, fadlan buuxi kuwaan soo socda.

Magaca Koowaad

Aabaha

Magaca Awoowaha

Ciwaanka guriga

Magaalada

Wadanka

Gobolka

Zip Code

Taleefoon nambarka

Wakhtga wicida

Taleefan kale

Ciwaanka E-mail ka

( )

( )

## 5. Saxiix Halkaan

Saxiix qofka ama wakiil la aqoon sanyahay

Magaca

Taariikhda

## 6. Noo sheeg haddii aad isla hadda u baahantahay caawimaad cunto

**Su'aalahan waxay naga caawin doonaan inaan go'aasano inaad u qalanto inaad hesho caawimaad cunto oo dagdag ah.**

Imisa qof baa kula nool ood wax usoo gaddaa, wax u hagaajisaa, oo cuntada kula cuna?

**Uga jawaab su'aalahan kali ah dadka aad usoo gaddo, u hagaajiso, oo kula cuna cuntada.**

Wadarta dakhliga kusoo galay bishan canshuurta ka hor ma kayaryahay \$150?  Haa  Maya

Isugaynta dakhligaaga bishan hadda lagu jiro maway noqonaysaa ebar kadib markaad bixiso canshuurta iyo kharashaadka kale ee guriga, kharashka daryeelka ilmaha/qof kugu tiirsan, iyo waxyaalaha aad bixisid ee cunugga lagu taageero?  Haa  Maya

Isugaynta lacagta aad u haysato kaashka, jeegga ama tan kuugu jirta akoonkaaga kaydka maway ka yartahay \$100?  Haa  Maya

Kirooyinkaaga billaha ah ama rahaamadd iyo waxyaalaha aad u baahantahay (sida gaaska, korantada, biyaha, iyo taleefonka) maway ka badanyihiin isugaynta dakhliga kusoo gala bishii canshuurta ka hor?  Haa  Maya

Mawaxaad tahay muhaajir ama shaqaale xiliyeed shirkad?  Haa  Maya

## 7. Wax nooga sheeg dadka gurigaaga jooga

**Waa inaad sheegtaa qof kasta oo adiga kula nool xittaa hadayna wax dalbanayn.** Fadlan xaqiiji inaad sheegto magacaaga marka ugu horeysa. Haddii aad u baahato meel dheeri ah ood wax ku qorto, ku dhagso waraaq kale oo gaar ah.

- **Sooshaal Lambarka:** Kali ah waxaa lagaa rabaa inaad sheegto lambarka qofka dalbanaya cawimaad kaash, mid cunto, ama mid daaweyn. Waa inaad sheegin lambarka qof dalbanaya caawinta daawo ee dagdagga ah ee la siiyo dadka soo galootiga ah.
- **Muwaadin Maraykan:** Kali ah waa inaad sheegtaa haddii uu qofu yahay muwaadin Maraykan haddii ay dalbanayaan caawimaad lacageed, mid cunto ama mid daawo.
- **Jinsi (lab ama dhadig):** Haddii uu qoyskaagu dalbanayo kali ah caawimaad cunto, ha ka jawaabin su'aasha la xiriirta jisiga (lab ama dhadig).
- **Sijiga/Qoomiyadda:** Ciwaanka VI ee Xeerka Xuquuqda Shicibka ee 1964kii ayaa noo ogalaanaya inaan waydiinno warbixinta Sinjiyadda/Qoomiyadda (inay tahay Hispanic ama Latino). Haddii aadan doonayn inaad na siiso warbixintan, saamayn kuma yeelan doonto kiiskaaga. Haddii aad na siin waydo warbixintan, shaqaalaha ayaa jawaab galin doona.

Magaca (Kan Koobaad, Kan danbe)	Waxaad isu tihiin (xaaskaaga, wiilkaaga, saaxiibkaa, iwm.)	Lambarka Amniga Bulshaa	Taariikhda Dhalashada	Jinsi Qor F ama M	Muwaadin Maraykan Qor Y ama N	Sinji	Hispanic ama Latino Qor Y ama N
	Naf						

**Ma xaas baad tahay?**  Haa  Maya Magaca xaaska: \_\_\_\_\_

Uur ma leedahay ama maleeyahay qof ka mid ah dadka aad dalabka u samaynayso? Ka jawaab haddii aad dalbanayso caawin lacageed ama mid daawo oo kali ah.

Haa  Maya haddey haa tahay, waa kuma qofka urka leh? \_\_\_\_\_

Adigu ma u baahantahay ama qof aad wax u dalbaysa ma u baahanyahay, kalkaaliye guri / daryeele guri?

Haa  Maya Haddey haa tahay, waa kuma qofkaas? \_\_\_\_\_

Waa tee luuqadda aad doorbiddo? Kuhadalka: \_\_\_\_\_ Qorista: \_\_\_\_\_

## 7. Wax nooga sheeg dadka gurigaaga jooga (oo siisocota)

Majiraa qof 60 jir ah ama ka wayn?  Haa  Maya

Haddey haa tahay, ka jawaab su'aasha qaybtan. Haddey maya tahay, Fadlan u noqo su'aasha 8aad.

Qofkan mawuu helaa taakulaynta dadka naafada ah?  Haa  Maya

Haddey haa tahay, xaggee buu ka helaa? \_\_\_\_\_

Qofkan ma awoodo miyaa inuu cunto diyaarsado iyadooy sababtu tahay naafanimada?  Haa  Maya

Haddii aad kaga jawaabtay "Haa" sadexdii su'aalood ee u danbaysay, qofkan raba inuu helo caawinta cunto ma wuxuu u raba in si gaar ah looga siiyo dadka kale ee kula nool?  Haa  Maya

## 8. Dhaqaalahaaga wax nooga sheeg

Ma heli doonaan adiga ama dadka ku nool gurigaaga dakhli bishan dhexdeeda?  Haa  Maya

Dakhli waxaa laga wadaa dhamaan lacagta aad adigu ama dadka gurigaaga jooga ay helaan sida lacagta laga helo shaqaalanimada, caawinta ilmaha/xaaska/caawinta daawayneed, taakulada naafada, taakulada howlgabka, Magdhowga Shaqaalaha, Gargaarka Bulshada, SSI, Taakulada Halgamaaga, iwm.

Haddey haa tahay, fadlan buuxi qoraalkan hoose.

Magaca	Nooca Dakhliga	Cadadka dakhliga (canshuurta ka hor)	Wakhtiga la Helo (asbuucii, labadii asbuuc, iwm)	Taariikhdi ugu Danbaysay ee la Helo

Imisa ayaad u haysataa adigu ama dadka gurigaaga jooga ay u haystaan kaash ahan, jeeg, ama idinku jirta kaydka (sida akoonada bangiyada, faa'iidooyinka sanadkii idiin dhigma, istook, ama boondhis)?

Kusheeg qiyaastaada ugu fiican ee isugaynta: \$ \_\_\_\_\_

Qof gurigaaga ka mid ah shaqo ma ka tagay ama ma waayay 60kii cashee u danbaysay?  Haa  Maya

Haddey haa tahay, waa kuma? \_\_\_\_\_ Goorma? \_\_\_\_\_

Sababteese? \_\_\_\_\_

Qof gurigaaga jooga ma kujiraa mudaharaad shaqo?  Haa  Maya

Haddey haa tahay, waa kuma? \_\_\_\_\_

## 9. Kharashaadkaaga wax nooga sheeg

Kharashaadkeed bixisaa adigu ama ay bixiyaan dadka gurigaaga jooga? Fiiri dhamaan kuwa soo hoos galaya. Sheeg cadadka kharash kasta.

Kharashaadka meesha xanaanada ilmaha ama qof kugu tiirsanay

Qiyaasta cadadka la bixiyo bil kasta: \$ \_\_\_\_\_

Haddii aad uga baahan tahay caawin kharashaadka daryeelka ilmaha, kala xiriir CDJFS ta deegaankaaga codsashada daryeelka ilmaha.

Bixinta kharashaadka taageerada ilmaha/xaaska/daawada

Qiyaasta cadadka la bixiyo bilkasta: \$ \_\_\_\_\_

**Kharashaadka daawayn ee qofka naafada ah ama jira da'da 60 ama ka wayn.** Tan waxaa ku jira kharashaadka sida biilasha daawada, qoraalada dhakhtarka, caymiska caafimaadka, ama adeegyada kale ee caafimaad. Ha ku darin lacag aad ku bixisay taageero caafimaad ood ku sheegtay qaybta kore ee sanduuqa (check box). Qiyaasta cadadka la bixiyo bil: \$ \_\_\_\_\_

**Bixinta Kirada / Rahaamadda**

Qiyaasta cadadka la bixiyo bilkasta: \$ \_\_\_\_\_

**Adeegyada** – Fadlan calaamadi adeegyada aad lacagta ka bixiso kuwan hoose.

**Lacag ma ka bixisaa kululeeyaha iyo/ama qaboojiyaha?**

Haa  Maya

Gaas  
 Taleefoon  
 Qashin

Koranto  
 Biyo  
 Bulaacad  
 Waxkale

## 10. Sixiixa qofka codsigan ama foomkan buuxiyay ama dhamaystiray

**Markaad sixiixdo dalbashadan waxaad tidhi:**

- Waxaan fahmay su'aalaha ku qoran foomkan oon caddeynayaa anigoo la socda ciqaabta ka dhalan karta warbixin marin habaabin oo la bixiyo, in dhamaan jawaabahaygu ay saxsanyihiin oo ay u dhamaystiranyihiin inta ugu saraysa een ogahay, marka lagu daro warbixinta ku saabsan muwaadin nimada ama heerka soo galootinimada ee xubin kastoo qoyska ka mid ah oo dalbanaya caawimaad.
- Waxaan caddeynayaa anigoo la socda ciqaabta ka dhalan karta warbixin khaldan oon dhiibo inaan sheegay dhamaan faa'iidooyinka sanadlaha ah een helo iyo adeegyada kale ee dhaqaale kuwaasoo aniga iyo/ama xaaskaygu aan faa'iido ku qabno.
- Waxaan fahmay oon ogalaaday inaan keeno dikumintiyo caddaynaya waxaan sheegay.
- Waxaan fahmay oon ogalaaday in CDJFS ay la xiriiri karto dad kale ama ururro si ay uga hesho caddeynta muhiimka ah ee u qalmitaankayga caawin iyo heerka caawinta ama ay caawintu gaadhsiisantahay.
- Waxaan fahmay markaan sixiixayo dalbashadan oon helo Ohio Works First, inaan u igmanayo Gobalka Ohio wixii xuquuq caawimaad ah ee ku socota ilmaha/xaaska taasoo aniga la isiinayo iyo/ama caruurta yaryar ee ku jira kooxda la caawinaya inta lagu guda jiro mudada u qalmitaanka Ohia Works First.
- Waxaan fahmay markaan sixiixayo dalbashadan oon helo Gargaarka Caafimaad ee Ohio(Medicaid) inaan u igmanayo gobalka Ohio wixii xuquuq ah ee ku wajahan taageero daaweyneed iyo wixii xuquuq ah ee la xiriirta lacag laga bixiyo qof sadexaad oo u qalma caawimaad taageero oo aniga la isiiyo iyo/ama caruur yaryar oo ku jira kooxda la caawinayo inta lagu guda jiro mudada u qalmitaanka Gargaarka Caafimaad (Medicaid eligibility period).
- Waxaan fahmay in la iga baahan karo inaan kala shaqeeyo haayadda hirgalinta taageerada ilmahaal samaynta waalid ama u soo saarista amar taageero. Haddii la iiga ii baahdo inaan la shaqeeyo haayadda hirgalinta taageerada ilmaha, tixraac ayaa loo gudbin doonaa haayadda iyadoo aniga la I matalayo. Waxaan sidoo kale fahmay haddii aan la iiga baahnayn inaan la shaqeeyo haayadda hirgalinta taageerada ilmaha, inaan codsan karo adeegyada taageerad ilmaha anigoo dhamaystiraya "Dalbashada Adeegyada Taageerada Ilmaha" ee JFS 07076.
- Waxaan fahmay in wakhtiyada qaar, la I waydiisan karo inaan ogalaansho u siiyo CDJFS inay samayso xiriirada muhiimka ah oo dhan si loo ogaado u qalmitaankayga.

Sixiixa Codsadaha ama Wakiil la Aqoonsanyahay	Haddii uu yahay Wakiil la Aqoonsanyahay, Waxa ay Isuyihiin Codsadaha	Taariikhda

## 11. Waxa aad samaynsid Markaad buuxisid foomkan

**U celi foomkan xafiiska QyabtaShaqada iyo Adeegyada Qoyska ee Dagmadaada.**  
Si aad u raadiso xafiiska dagmadaada gal [http://jfs.ohio.gov/County/County\\_Directory.pdf](http://jfs.ohio.gov/County/County_Directory.pdf)

## Xuquuqdaada ka shicib ahaan

Sharciga fadaraalka iyo siyaasadaha Qaybta Beeraha Maraykanka (U.S. Department of Agriculture) (USDA), Qaybta Caafimaadka iyo Adeegyada Bani'adamka (U.S. Department of Health and Human Services) (HHS), Qaybta Shaqada iyo Adeegyada Qoyska Ohio (Ohio Department of Job and Family Services) (ODJFS) iyo Qaybta Deegaanka gudaha ee Shaqada & Adeegyada Qoyska (CDJFS) waxay dhahaan waa inaanaan wax ku kala faquuqin iyoon u eegayno sinji, midab, dhalasho, asal, jinsi, da, ama naafanimo. Sida uu qabo Sharciga Cuntada iyo Quudinta iyo sida ay dhigayaan siyaasadaha USDA, waa mamnuuc in qof lagu faquuqo ama lagu takooro iyadoo loo eegayo diintiisa iyo siyaasadda uu aaminsanyahay.

Si aad u xarayso cabasho takoorid, u qor ama wac USDA, HHS, ama ODJFS.

### U Qor ama Wac:

#### USDA

Iskuduwaha, Xafiiska Xuquuqda Shibilka  
Room 326-W, Whitten Building  
1400 Independence Avenue, S.W.  
Washington, D.C. 20250-9410  
(202) 720-5964 (voice and TDD)

### U Qor ama Wac:

#### HHS

Region V, Xafiiska Xuquuqda Shibilka  
233 N. Michigan Ave., Suite 240  
Chicago, Illinois 60601  
(312) 886-2359 (voice)  
(312) 353-5693 (TDD)  
(312) 886-1807 (fax)

### U Qor ama wac:

#### ODJFS

Waaxda Xuquuqda Shibilka  
30 E. Broad St., 30th Floor  
Columbus, OH 43215  
(614) 644-2703 (voice)  
1-866-227-6353 (toll free)  
(614) 752-6381 (fax)  
1-866-221-6700 (TTY)

USDA, HHS, iyo ODJFS waa kuwo si saman u bixiya fursadaha iyo shaqaalaynta.